2016-2019

# Qorshaha maareeynta

Qeexitaanka farsamo ee shaqooyinka heerarka ee wax soo saarida ilaalinta deegaanka ilinka hore

# Waxyaabaha

Qorshaha maareeynta ........ 2
T1.1 Aaga khudrada ........ 3
T1.11 Aagaga cawska ........ 4
T1.112 Cawska labeero iyo aagaga cawska aadka u baxa. ........ 5
T1.12 Geedaha, duurarka, dayrarka iyo sariiraha ubaxa ........ 6
T1.121 Geedaha ........ 6
T1.122 Duurar ........ 8
T1.1222 Dayrarka lasharxay ........ 9
T1.1223 Nagaarka labeeray ........ 9
T1.123 Ubaxyada ........ 10
T1.124 Geedaha korida ........ 10
T1.125 Joogtooyin ah ........ 11
T1.1253 Geedaha nuura ........ 12
T1.126 Geedaha sariirta ah ........ 12
T1.2 Geedaha dhulka daboola ........ 13
T1.21 Goobaha dhagxaanta, bareeyada, sibirka shubka ah, qaruuraxa iyo laamiga ........ 15
T1.23 Meelaha alwaaxa lagu daboolay ........ 15
T1.3 Qalabka ugaarka ah dhulka lahormarshay ........ 17
T1.31 Xirmooyinka iyo aaladaha wax lagu galo ........ 17
T1.32 Qalabka- ciyaarta iyo isboortiga ........ 17
T1.38 Qalabka ugaarka ah dhulka lahormarshay ee kala duwan ........ 18
T1.41 Qalabka Ilinka hore ........ 19
T1.81 Boosaka maamulida qashinka (xarunta dib u wirshadaynta) ........ 19
T1.83 Dayrarka ........ 19

# Qorshaha maareeynta

## Waxay ufurantahay kunturaad kaliya mudada 2016-2019

Qorshaha maareeynta wuxuu bixinayaa qeexitaan farsamo oo kooban ee shuruudaha shaqo iyo heerarka cabbiraada ee la saaray qaybaha kala duwan ee deegaanka ilinka hore (wax soo saarida maaraynta). Waxay sidoo kale bixisaa sawir wanaagsan oo ah aagaga muhiimka u ah maaraynta iyo hubinta (kormeerida) iyo shaqooyinka ugu wayn deegaanka ilinka hore.

Hadafka qorshaha maaraayntu waa in lasameeyo yool cad oo lacabirikaro ee dhamaan qaybaha. Qorshaha maaraayntu waa qalab maarayn oo muhiim u ah macmiilka iyo kunturaadlaha labadaba. Ujeedada qeexitaanka farsamo waa ia bixiyo faham guud ee shaqoooyinka iyo shuruudaha.

Habka xaqiijinta tayada waxay kadhigantahay in kunturaadluhu uu fuliyo hawsha saxda ah waqtiga saxda ah uuna adeegsado alaabta saxda ah. Sidaa awgeed, miiska shaxda iyo cabirada qeexida labaduba (xasuus qor) waxaa laga doonayaa inay awood ulahaadaan inay lasocdaan ayna hubiyaan inay waafaqsantahay shuruudaha gaarka ah ee iskaashatada guriyaynta. Taasoo kadhigan baahida loo qabo yoolal guud iyo luuqad guud. Kunturaadadaan, aqoonsiyada AFF iyo shuruudaha gaarka ah ee SABO ayaa loo adeegsadaa deeganka ilinka hore. Systemka AFF waa qalab loogu talagalay iibsiga iyo maamulka wax soosaarka labadaba ee maaraynta hantida ee deegaanka sare. Mulkiilaha hantida waxaa saaran masuuliyad guud oo deegaanka hore ah - oo ah inay buuxiso ujeedooyinka mujtamac, bilicda iyo awooda dhaqaale ee dadka deegaanka.

Cabiradaas (hawlo) kuwaasoo dib looga soodaray qorshaha maaraynta waa in sidoo kale lagu daraa qorshaha wax soosaarka ee sanadka. Kani wuxuu noqon karaa qorshe xiliyeed fudud oo leh xasuus qoraaleed ama wax lamida. Way fududaan doontaa in la aqriyo, lahubiyo lana socdo dhamaan qaybaha. Gudiga waxaa kamida,kormeero, taasoo kadhigan in qaladaadka ama waxyaalaha kasoko dhaca waa la wargalinayaa si degdeg ah waana lasaxayaa marka laga joojiyo Brf Skogshöjden. Gudiyadaan waxaa lagu bixinayaa markasta qoraal ahaan.

Inta lagu jiro mudada kunturaada, afar hawgal ayaa hagaaya shaqada kasocota deegaanka hore: qorshaynta, fulinta, lasocoshada iyo kobcinta deegaanka sare ee iskaashatada guriyaynta. Si loogu guulaysto ujeedooyinka dagsan, labada qayboodba waa inay sameeyaan xaqiijin tayo iyo shaqo system ahaan kormeer taxadar leh. Arag fig. 1.

**Sawirka 1. Xaqiijinta tayada wax soosaarka**





Bild 2: Arbetet med egenkontroll ska utföras systematiskt och med fokus på att ha kontroll över verksamheten ur miljösynpunkt och förbättra kontrollen. Arbetet kan liknas vid de metoder som används i frivilliga miljöledningssystem.

## T1.1 Aaga khudrada

### *Shayga maareeynta*

Aaga cawska, geedaha, duurarka, dayrarka iyo sariiraha ubaxa ee leh joogtooyinka iyo guluubyo iyo qabuuro

### *Shuruudaha shaqo*

Meelaha cawska leh, geedaha, dayrarka, guluub samaynta iyo meelaha sariiraha ubaxa oo leh joogtayaal iyo waxyaalaha kale ee beerma ee laga helo qabuuraha, ayna kamidyihiin dhulka kuwareegsan waa lamujiyaa si ay uyeeshaan muuqaal ah in sifiican loo ilaalshay si dareen biliceed uqalma boosaskooda. Deegaanka hore waa inuu ushaqeeyaa si wacan uuna muujiyaa kobac xoogan.

Geedaha daciifaaya, caleemaha, laamaha yar yar iyo waxyaalaha unugyada kale, marka macquul tahay, waa in lagu dhaafo nagaarka dhexdiisa iyo meelaha kale ee quman ee cagaarka ah maadaama tani aysan keenayn qanaaco xumo ama sababayn aagu inuu foolxumaado. Caleemaha waa lawalaaqayaa waana la ruxayaa hab ay suuragal tahay kahor intaan lajarin.

Ilaalinta iyo maaraynta waa n loo sameeyaa qaab deegaan ahaan kufiican, taasoo kadhigan in, tusaale ahaan, shidaal kushubida qalabka matoorka kushaqeeya iyo mashiinada waa inay leeyihiin aqoonsi deegaan oo kuhaboon, sida Aspen, ama nooc lamida. Mashiinada waa inaan lacidlayn iwm. Mashiinada korontada kushaqeeya ayaa fiican. Mashiinada iyo qalab si xun loo maamulay oo qiiqa badan soosaara waa inaan gabi ahaanba la isticmaalin.

Qashinka cagaaran waa in laga saaraa wasaqda caadiga ah waana inaan laysku darin. Cadad badan oo qashin cagaaran ah waa in lageeyaa xarunta dib uwarshadaynta dawlada hoose ama meelaha kale ee warshadaynta. Dhamaan aagaga waa in laga dhigaa mid nadiif ka ah qashinka iyo wasaqda.  Kormeerka aagaga waa in lafuliyaa ayadoo lagu xiraayo nadiifinta guud.

Dhamaan qalabka maaraynta waa in lagaliyaa qorshaha wax soosaarka (qorshe xiliyeed) Arag fig. 2.

### *Maaraynta*

Nadiifinta gu'ga waa in ladhamaystiraa 30ka April nadiifinta diraacdana waa ladhamaystiraa 15ka November. Nadiifinta gu'ga iyo diraacda waxaa laga wadaa in dhamaan aagaga laga nadiifiyo qaruuraxa xagaaga, wasaqda, caleemaha iyo waxyaalaha kale ee shisheeyaha ah. Wasaq nuugida iyo kormeerka waa in lasameeyaa dhamaan daadadka soosocda ee xiliga

shaqada khudrada kahor 1da April. Sidoo kale waxay qusaysaa nadiifinta diraacda halkaasoo kormeer looga baahanyahay kahor roobka dayrta. Daadadka waa inay nadiif ahaadaan ayna nadiif ka ahaadaan caleemo iyo ciid, sidaa awgeed korka wadada iyo biyaha ay ugusocdaan si madax banaan. Nadiifinta guud waxaa loosameeyaa si joogtaa, hal mar asbuucii.

Baarista ciida waxaa lasameeyaa hal mar sadexdii sanaba. Ayadoo laga fiirinaayo natiijooyinka baarista, cabirada muhiimka ah waa in lasameeyaa, sida daawaynta iyo kobcinada ciida ee magdhaw dheeri ah. Baaristii koobaad waa in lasameeyaa September 2016 Tan waxaa lasamaynayaa ayadoo lala tashanaayo B.

**Sawirka 2. Qorshaha wax soosaarka - qorsha xiliyeedka**

## T1.11 Aagaga cawska

### *Shayga maaraynta*

Cawska labeero iyo aagaga cawska aadka ubaxa.

### *Shuruudaha shaqo*

Dhamaan aagaga cawska leh waa in loo gartaa mid caafimaad qabta, dhamaan oo cagaaran. Waa in laga sifeeyaa maandooriyaasha halista ah iyo waxyaalaha kale ee shisheeyaha ah. Cawsku waa inuusan qalalin ama yeelan dhibco dhintay ama halis kale. Aagaga Cawska waa in loo arkaa heer oo tigan.


Dheerarka cawska ee cawska labeeray waa inuu noqdaa inta udhaxaysa 40mm iyo 100mm.

Rarida jadwalka waa in loosoosaaraa aagaga cawska.

### *Maareeynta*

Aagaga cawska leh wuxay helaan nadiifin guud, waa laruxaa ama laysku aruuriyaa caleemaha gu' kasta iyo dayr sidaa awgeed cawska duuga ah, caleemaha, faliiqyada, laamaha, dhagaxaanta iyo wasaqda waa lasaaraa. Godad kala duwan ayaa labuuxshaa kadib joojinta. Sidoo kale ayaa lagu sameeyaa simida iyo dayactirka meelaha balaaran.

Cawska waa in lagu jaraa sakiino afaysan mashiinka cawska jara oo siman. Sakiinada waa in si joogtaa loo hubiyaa si loo helo dhaqdhaqaaqa ugu wanaagsan. Mashiin kujarida ayaa lasameeyaa ayadoo lafiirinaayo shuruudaha shaqada.



Mashiin kujarida ee xiliga gu'ga dib ayaa loo dhigi karaa ilaa cawsku uu gaaro dheerar ugu badnaan 100mm.

## T1.112 Cawska labeero iyo aagaga cawska aadka u baxa.

### *Maareeynta*

Mashiin kujarida waa in lasameeyaa ugu yaraan 18-20 jeer sanadkii uuna kuqanco shuruudaha shaqada ee cawska labeero.

Hoos udhigida caqabadaha kuwareegsan waa in lasameeyaa kadib jarida 4aad ee kasta.

Baarka cawsku wuu sii jiri doonaa, ayadoo lamalaynaayo inaysan jirin wax raasamaal muuqda oo soo baxa. Majiraa xargo ama rasooyin caws ah oo looga tagi karo aagaga cawska. Baararka cawska looma gola meelaha adadag. Meelahaan waa in nadiif laga dhigaa.

Waraabin waa in lasameeyaa, ayadoo lala tashanaayo B, haduu jiro angag dabadheeraaday.

Mashiin kujarida xiliga diraacda waxay qusaysaa caleemaha oo lawalaaqo. Caleemaha waa lagooyaa si aysan gogol ugu dulnoqon cawska labeeray. Labo kamida sadexdii mashiin kujarid ee ugu danbaysay ee xiliga ayaa loo sameeyaa walaaq ahaan.

Daawayn ayaa lasameeyaa ee kuurada NPK dabayaaqada gu'ga iyo bilowga xagaaga kahor bartaha xagaaga ayadoo laraacaayo tilmaamaha soosaaraha. Qarash shaygaan waxaa bixinaaya B.

Simid cawska ah oo dheeri ah ayaa lagu sameeyaa baarka kore ee wax yeeloobay, cida cusub lagu daray ama meesha cawska kago'ay ama kabaxay.

Cawska aadka ukora ayaa kabixi kara meelaha gaar loogu talagalay. Meelahaas waa lajaraa ayadoo laraacaayo jadwal kale oo jarid ah. Jarida koobaad waxaa lasameeyaa bartamaha xagaaga, marka ubuxu magooliyo. Aagaga kadib waa lajaraa si joogta ah ilaa dabayaaqada dayrta/diraacda. Cawska aadka ukora wuxuu ufiicanyahay isku milanka caswyada.

### *Maareyn saxid ah*

Waxyeeloobay, jiran ama qaybaha dhintay ee cawska labeeray waa ladayactiraa waana labadaqlaa. Simida, kor kadaboolida iyo hawo siinta si lamida daawayn dheeri ah ayaa lagu sameeyaa magdhawga dheeriga ah kadib markii lala tashto B. Talaabooyinkaan si joogta ah ayaa loobalaarshaa qorshaha maaraynta dhexdiisa.

Maaraynta qorshaysan iyo maalgalinada kale ee meelaha cawska waxay kujiraan qorshaha maaraynta.

## T1.12 Geedaha, duurarka, dayrarka iyo sariiraha ubaxa

### *Shayga maaraynta*

Geedaha, duurarka, ubaxa aan aadka ukorin, geedaha lakoro, jootooyinka iyo geedaha sariiraynta.

### *Shuruudaha shaqo*

Geedaha ay kuwareegsan yihiin meelaha khudradu kabaxday waa lamuujiyaa si geeduhu ay ugu jiraan xaaladqa wanaagsan, nuuraan ayna ukoraan si caadi ah boosaskooda. Bixiyaan dabci wanaagsan iyo dareen bilic leh ee aagaga. Geedaha waa in lagu beeraa dhanka midig, taasoo kadhigan in deegaanku uu unoqonaayo mida sax ah qaybaha. Geed balaaran, tusaale ahaan, wuxuu ubaahankaraa dhul balaaran iyo naacaw badan oo dusheeda ah si ay ukorto. Geedaha daahan waa in lagu beeraa meelaha hooska leh geedaha qoraxda kubaxan lagu beeraa meelaha qoraxda leh. Isku talaalida iyo qorshayn dheeri ah waa in lasameeyaa dayrta/diraacda iyo/ama kahor intaan khudrada aysan bilaabin inay soobaxdo xiliga gu'ga. Tani maqusayso geedaha sariiraynta ah kuwaasoo leh jadal ubxin ah.

### *Maareynta*

Geedaha waa in laysku xiro sidaa awgeed galitaanka iyo badqabnimada wadooyinka waa la ilaalshaa, Dadka wada gudbaaya iyo wadoonyinka wareegsan si lamidana meelaha guryaha kudhagan. Waa muhiim si gaar ah in la ilaaliyo meelaha araga iyo jooga gawaarida.

Laamaha soo dheeraara waa in lajaraa xiliga xagaaga (July-September) si kor loogu qaado amaanka iyo galitaanka dadka. Taas waxay sidoo kala qusaysaa geedaha buuxiya meelaha beerta.

Jaritaan nidaamsan ee geedaha iyo dayrarka ayaa lasameeyaa dabayaaqada dayrta iyo/ama diraacda ayadoo lala tashanaayo B.

Aaga waa in laga jaraa geedaha sunta ah ugu yaraan 5-6 jeer sanadkii. Waa muhiim inaad bilow kahortaga geedaha sunta ah bilowga xiliga, marka geedaha sunta ah ay yihiin qiyaastii 4-6 caleemood (2 caleemood oo run ah). Habka SABO ee 14 daqiiqo ayaa ladoorbidaa. Tani waxay kadhigantahay geedaha sunta ah waa la ogaan karaa xaalada ugu horaysa ayadoo leh cabirada saxda ah ayna dib unoqdaan daba yaaqada xagaaga.

Daawaynta waxaa lasameeyaa xiliga gu'ga e unugyada sida huudhada iyo dooxa lo'da si lamidana daawada NPK.

Waraabinta waxaa lasameeyaa waqtiyada uu jiro angag daba deeraaday iyo ayadoo lala tashanaayo B. Boorsooyinka waraabinta sida Treegatorka ayaa loo isticmaalaa geedaha dhawaan baxa ah. Kuwaan waxaa ladaboolaa xiliga gu'ga waxaan lajaraa dayrta. Boorsooyinka si joogto ah ayaa loo buuxshaa, ugu yaraan 14kii maalmoodba.

Wax yaalaha geedka laga jaray waa laysku keenaa, la walaaqaa laguna huudhiyaa nawaaxiga guriga ilaa ay wasaqdu darantahay ayna qasab tahay in meelo kale loo raro.

### *Maarayn saxid ah*

Geedaha waxaa loobadalaa magdhaw dheeri ah kadib marka lalatashto B. geedaha dhintay iyo geedaha kale si degdeg ah ayaa loo siibaa hadaysan shaqaynayn ama hadii ay amaan xumo ka abuuraan aaga. Beeritaanada qaldan waa in lajaraa si buuxdaa ama lasiibaa kadib marka lalatashto B.

Cabiradaan waa shaqo "ÄTA" (Iskubadalida iyo kudarida) waana in lagu daraan qorshaha maaraynta.

## T1.121 Geedaha

### *Shayga maaraynta*

Beerta dhirta iskood ubaxay- iyo geedaha sharaxaada, geedaha wadada iyo geeadaha qurxinta, ayna kujiraan geedaha khudrada, ceelasha geedaha, geedaha albaabka iyo taageerida geedaha.

## Shuruudaha shaqo

Geedaha ay kuwareegsanyihiin meelaha khudradu kabaxday waa la maareeyaa si ay xaalad wanaagsan ugu jiraan si caadiyana ukoraan meela kaladuwan iyo qaybaha si lamidana ay helaan korniin wanaagsan oo leh ugxan korid sax ah, ubxin iyo sidoo kale caleen kobac leh. Geedaha kabaxay meelaha lasimay oo udhaw meelaha baakinka ama meelaha lamdka ah waa in markasta lagu wadaa boorsooyinka waraabinta inta lagu jiro xiliga koritaanka, April-Sept. Waraabinta waa in loo sameeyaa si joogto ah si loo yareeyo waxyeelada abaarta. Sidoo kale tani waxay qusaysaa geedaha dhawaan labeeray dhamaan waqtiga ay qaadanayaan inay iskood u istaagaan. Quudinta joogtada waxaa lagu sameeyaqa boorsooyinka waraabka, iyo ayadoo laraacaayo talooyinka soosaaraha.

Taageerooyinka geedka waa in la siibaa hadii geeduhu beermeen. Waa inaysan si jirin. Taageerooyinka dabcay waa in laqotomiyaa. Ceelasha geedaha iyo shabaagyada waa in laga nadiifiyaa wasaqda, si isdhaafsiga hawada ee xididadu u dhacdo.

Jarida dheeraadka waa in si joogta ah loo sameeyaa sanadkoo dhan, laakiin maaha marka dheecaanku uu oo koro xiliga gu'ga.

Dhareerada biyaha iyo xidid dhuuqayaasha waa inaan lagu arag geedaha. Geedaha waxyooloobay waa in si degdeg ah loo wargaliyo loona saxo, sidoo kalana ladukumiintigareeyo ayadoo sawiro leh lanana tashanaayo B.

## Maareynta

Geed jarida waa in lasameeyo ayna sameeyaan shaqsiyaadka oo leh xirfado shaqo ee jarida iyo xanaanaynta geedka ama tayo udhiganta iyo sidoo kale leh aqoon ee shuruudaha badqabka ee meelaha taraafikada. Dhexdhexaadnimada ee jarida xad dhaafka waa muhiim. Cabiraadaha balaaran waa in lagaliyo qorshaha xanaanaynta geedka ayadoo lalatashanaayo B.

Waraabinta waa in lasameeyaa April ilaa October ayadoo la adeegsanaayo boorsooyinka waraabinta laguna daraayo wax yar oo kuurada daawo ah. Geedaha waa wayn waa in lagu wareejiyaa labo boorso. Boorsooyinka si joogto ah ayaa loo buuxshaa, ugu yaraan 14kii maalmoodba.

Geedaha kuyaala meelaha cawska leh waa in laga ilaaliyaa caws jarayaasha ee meelaha degdega ah ee udhaw jirida geedka lagana dhigo mid aan caws ku oolin oo ciid leh, lawalaaqo ama lagu beero aagaga jirida. Hadii larabo in cabiradu ay abuuraan meelo aan caws lahayn (boholo) meelaha udhaw geedaha, kadib tan waxaa lagu sameeyaa joojino ka imaanaaya B.

Geedaha kuxiga meelaha wadada udhaw waxay leeyihiin laamo ugu yaraan dheerarkoodu yahay 2m ama kabadan.

Da'da waa lahubiyaa waana labalaariya ugu yaraa labo jeer sanadkii labada sano ee ugu horaysa ee geedka cusub. Intaas kadib, iskuhabaynta da'da waa lasiibaa hadii geedku iskii iskutaago.

Dareerada biyaha- iyo xidid dhuuqayaasha waa lasiibaa laba jeer sanadkii.

Geedaha waa in lajaraa, kadib marka lala tashto B, inta lagu jiro dayrta/diraacda ilaa in qaybuhu rabaan jarid xiliga gu'ga iyo xagaaga.

Jarid habaysan waa in lasameeyaa labo ilaa sadexdii sanoo kasta. Cabirkaan waa in lagu daraan qorshaha maaraynta waana in lagu fuliyaa joojinada B.

Geedaha sida habaysan loo jaray gaarayna xajmigoodii ug danbeeyay iyo qaabkooda waa in loo jaraa heerkii ay ahaayeen sanadkii hore si loo maareeyo qaabka iyo muuqaalka. Cabirkaan waxaa lagu fuliyaa joojinada B iyo magdhaw dheeriah.

Meelaha aan cawska lahayn ee geedaha udhaw waa in laga ilaalshaa geedaha sunta ah. Jarida ugu yaraan 5-6 jeer sanadkii.

### Maareyn saxid ah

Geedaha ay kamuuqato xaalad liidata keenana halis amaan waa in lasiibaa. Cabirkaan waa in lagu bixiyaa magdhaw iyo ayadoo lala tashanaayo B.

Hawlkasta oo laxariirta isku tlaalida geedaha ama cabirada waawayn ee kale si aaladooda loo kbciyo ayaa lagu sameeyaa joojinada B iyo latashiga lataliye ama wax lamida.

Waxyeelada waa in ladaweeyo si degdeg ah ayadoo lala tashanaayo B. Cabirada waa in lagu dukumiintigareeyaa qorsha geedka.

## T1.122 Duurar

### Shayga maaraynta

Nagaarka sharaxaada (qurxinta) duurarka beeriga, dayrarka iyo nagaarada labeeray.

### Shuruudaha shaqo


Duurarka leh aagag khudrad ay kabaxdo waa in lamuujiyaa si ay ugu jiraan xaalad wanaagsan, ifaan ayna kukoraan si caadi ah, ay ahaadaan kuwo caafimaad qaba ayna qiimo bilicleh siiyaan aagagaarka guriga. Nagaarka sharaxaada waa in ay bixiyaan dareen qeexitaan waana inuusan kadheerayn qaybta kale ee nagaarka. Dayrarka waa inay ahaadaan kuwo hudhush ah oo sii baxa. Qaab wanaagsan lahaadaan. Nagaarku waa inuu siiyaa deegaanka dareen muuqaal oo sii baxaaya. Majiraan qaybo shisheeye ah oo kuwaasoo iskood ubeermay meesha beerta oo loo ogolaan karo inay koraan, sida kaynta maple, aspen iyo ash.

Daawaynta waa in lasameeyaa xiliga gu'ga ayadoo lagu daraayo unugyo. Inta xagaaga aytahay, caws jarida waxay sidoo kale noqotaa kuurada N. xiliga dayrta, calaanjiga sida caleemaha, talfiiqyada iyo rafaaqa ayaa la adeegsada.

### Maareynta

Xakamaynta farsamo ee geedaha sunta ah, xaabada, dogobyada iyo xidid dhuuqayaasha waa in lasameeyaa 5-6 jeer sanadkii.

Duurarka waa in lajaraa si fudu sanad kasta, si dabeecada caadiga ah ee qaybaha/noocyada loo ilaalsho ayadoo laga raacaayo qorshaha dib ucurdaminta duurarka si looga hortago jarida adag ee curdanka.



Laamaha waxyeeloobay ama dhintay waa lasiibaa si joogta ah inta lagu jiro kobcinta oo dhan. Jarida curdaminta waa in lasameeyaa kadib marka lalatashto B ee magdhaw dheeri ah waana in lagu wdaraa wargalinta qorsha maaraynta.

Unugyada waxaa laga dhigaa lakabyo ugu yaraa ah 5-10cm balac ahaan xiliga gu'ga iyo dayrta. Tan waa in lagu aasaa ciida. Macmiilka ayaa bixinaaya waxyaalaha dheeriga ah iyo cabirada.

### Maareyn saxid ah

Duurarka iyo nagaarada qalala oona abuura aagag aan amaan ahayn waa in lajaraa ayadoo lalatashanaayo B cabiradana waa labixinayaa si joogta ah kadib marka lalatashto B. tani waxay sidoo kale qusaysaa duurarka dhintay ama jiran. \Jaritaanka maaraynta ah waxaa lagu fuliyaa ayadoo laraacaayo cabirada lagu qeexay qorshaha maaraynta.

## T1.1222 Dayrarka lasharxay

### *Shayga maareynta*

Dayrarka lajaray iyo dayrarka iskood ubaxa.

### *Shuruudaha shaqo*

Dayrarka waa inay lahaadaan sifo ay ku abuurmaan meela kalduwan oo dhulka ah. Waa inay caafimaad qabaan, hudhush yihiin ayna isku kolonyaysmaan sida dareen shaqo oo bilic leh. Dayrarka sharaxaada, waa inay lahaadaan qaab usahlaaya in layrku si sax ah uga gudbo. Dayrara iskood ubaxa waa inay ahaadaan hudhush ayna isku dhaganaadaan.

Daawaynta waa in lasameeyaa ayadoo lagu daraayo unugyo.

### *Maaraynta*

Xakamaynta farsamo ee geedaha sunta ah, xaabada, dogobyada iyo xidid dhuuqayaasha waa in lasameeyaa halmar sanadkii. Meelaha sariirta ubaxa waa inay kadheertahay cilada geedaha sunta ah iyo geedaha sunta ah ee xididada haleela.

Dayrarka waa in lajaraa sanadkasta kahor bartamaha xagaaga, oona si qaabaysan loo jaraa diraacda. Intaas kadib, jarid fudud, dheeri ah ayaa sidoo kale lasameeyaa August kadib marka lala tashto B.

Dayrarka gaaray xajmigooda ugu danbeeyay si qaabaysan ayaa loojaraa laguna celiyaa heerkii ay sanadkii hore joogeen ayagoo leh qoto hoose si ay uhelaan iftiin kufilan. Tan waxaa loosamaynaa si loo maareeyo qaabka iyo muuqaalka korniinka ee mudada soosocota. Jarida xiliga diraacda waa in lasameeyaa kadib markii lalatashto B ee magdhaw dheeri ah. Talaabada waa in lagu muujiyaa qorshaha maaraynta.

Geedaha dhintay waa in lasiibaa.

Daawaynta ayaa lasameeyaa xiliga gu'ga ayadoo lagu daraayo unugyo. Waxyaalaha kufiican waa dooxa lo'da, huudhada iyo busta. Shayga waxaa lagu fidiyaa lakab qiyaastii ah 5-10cm balac ahaan. B ayaa dhiibaaya qarasha waxyaabahaan..

### *Maarayn saxid ah*

Qaybaha qaybaha dayrarka kuwaasoo dhintay ama jiran waxaa lagu badalaa kuwo cusub kadib marka lalatashto B.

## T1.1223 Nagaarka labeeray

### *Shayga maareynta*

Naarka labeeray wuxuu camimayaa dhamaan qaybaha duurarka kuwaasoo iskug xiran tiro badan oona abuura dareenka 'qolalka' banaanka ah. iyo aagag xadeed si lamidana ala goysyo.

### *Shuruudaha shaqo*

Nagaarka labeeray waa in laga dhigaa qaybo kala xidhan ahna mid bilic ahaan kuraaligalinaaya. Uu ukolonyaysnaadaa sida mid caafimaad qaba oo leh dareen shaqo Mayeelankarto meela banaan ama waxyaalo kale kuwaasoo xumeeyaa dareenka guud. Nagaarku waa inuusan abuuri deegaano halis ah. Nagaarku sidoo kale wuu ubxinkaraa wuxuu soosaari karaa miro hadii ay kasamaysantahay qaybo noocaas ah.

Daawaynta waa in lasameeyaa sanad kasta ayadoo lagu daraayo unugyo lana walaaqaayo dayrta.

### *Maareynta*

Xakamaynta farsamo ee geedaha sunta ah, xaabada, dogobyada iyo xidid dhuuqayaasha waa in lasameeyaa halmar sanadkii.

Duurarka waa in lajaraa si fudu sanad kasta hal mar, si dabeecada caadiga ah ee qaybaha/noocyada loo ilaalsho ayadoo laga raacaayo qorshaha dib ucurdaminta duurarka si looga hortago jarida adag ee curdanka aaga oo dhan.

Laamaha dhintay oona waxyeeloobay waa lasiibaa halmar sanadkii.

Jarida curdanka waa in lasameeyaa kadib markii lalatashto B ee magdhaw dheeri ah. Talaabadaan waxaa lagu sameeyaa qorshaha maaraynta.

Daawaynta waxaa lagu sameeyaa unugyada sida dooxa lo'da, huudhada iyo busta oo lagaliyay lakab qiyaastii ah 5-10cm balac ahaan. Waxyaalaha waxaa qarashkooda qaba B.

### *Maareyn saxid ah*

Duurarka kujira naagaarka jiran, wax yeeloobay ama dhintay waa lasiibaa ayadoo lalatashanaayo B.

## T1.123 Ubaxyada

### *Shayga maareynta*

Noocyo kaladuwan oo ubax ah sida nagaarka, ubaxyada korida iyo kobaca hooseeya

### *Shuruudaha shaqo*

Qaybo kasta oo ubaxa ah waa inuu lahaadaa muuqaal raaligalinleh oo caafimaad qaba. Waa inuu lahaadaa dabeecad kobac taasoo kuquman qaybaha iyo ubaxin wanaagsan. Waa inaysan jirin waxyaabo carqalad keena oo ah geedaha sunta ah. Waraabinta iyo daawaynta waa in lasameeyaa sanad kasta xiliga gu'ga iyo dhamaan xiliyeedkaas.

### *Maareynta*

Ubaxyada waa lajaraa gu' kasta. Sadexda laamood ee ugu waawayn waa in ladaayaa. Jaritaanada waxaa lasameeyaa laamaha banaanka ubaxa.

Xakamaynta geedaha sunta ah ee farsamo, waa in lasameeyaa 5-6 jeer sanadkii.

Jarida xiliga xagaaga waa in lasameeyaa labo jeer sanadkii. Ubaxa go'ay iyo laamo kasta oo dheraad ah waa lajarayaa.

Daawaynta waxaa lagu sameeyaa unugyada sida huudhada, dooxa lo'da iyo busta oo lagaliyay lakab qiyaastii ah 5-10cm balac ahaan. Waxyaalaha waxaa qarashkooda qaba B.

### *Maareyn saxid ah*

Ubaxyada dhintay, waxyeeloobay oona jiran waa lasiibaa ayadoo lalatashanaayo B. Sidoo kale waxay saamaynaysaa caleemaha geedaha jiran. Talaabadaan waa in lagu muujiyaa qorshaha maaraynta.

## T1.124 Geedaha korida

### *Shayga maareynta*

Noocyo kalduwan oo geeadha korida kuwaasoo wax kora una baahan taageero. Tusaale ahaan, lematis, honeysuckle, Virginia creeper, blackberries, grapes iyo kiwi iwm.

### *Shuruudaha shaqo*

Geedaha wax kora waa inay leeyihiin bilic kuraaligalisa iyo dareen shaqo. Ay soobandhigaan cusayb iyo caafimaad qab ubxinaaya, miro leh oo sharaxan.

### *Maaraynta*

Maaraynta jarida waa in lasameeyaa sanadkasta. Laamaha dhintay, waxyeeloobay ama jiran iyo laamaha waa in lajaraa. Qaybaha aan iskood wax ukorin oona kubaxa dush ay kudhasheen.

Geedaha saarka ee guriga kudhagan waxaa yareeya jaritaanada meelaha daaqadaha udhaw, fooqa saqafka, iwm.

Xakamaynta geedaha sunta ah ee farsamo, waa in lasameeyaa 5 jeer sanadkii. Waraabinta waxaa lasameeyaa markay jirto angag dabadheeraaday ama marka geedo cusub labeeraayo silamidana marka ladayactiraayo.

Daawaynta waxaa sameeyaa labajeer sanadkii. Xiliga gu'ga ayadoo lagu daraayo dooxa lo'da, huudhada iyo busta, iyo xiliga dayrata ayadoo lawalaaqaayo caleemaha wasaqda huursan. Waxyaalaha waxaa qarashkooda qaba B.

### *Maarayn saxid ah*

Geedaha dhintay, jiran oona waxyeeloobay waa lasiibaa waana labadalaa ayadoo lalatashanaayo B.

## T1.125 Joogtooyin ah

### *Shayga maareynta*

Geedaha adkaysinka joogtaanak dheer leh kuwaasoo ka adag dayrta/diraacda. Joogtooyinku waxay leeyihiin dabeecado kaladuwan oo shuruudo ah waxaana lagu kooxeeyaa shuruudo kala duwan. Tusale ahaan, geedaha adkaysiga leh ee dhulka dhabacan, geedaha leh adkaysinka ee ubxiya oo dheer iwm.

### *Shuruudaha shaqo*

Geedaha ay kuwareegsan yihiin meelaha khudradu kabaxday waa lamuujiyaa si geeduhu ay ugu jiraan xaaladqa wanaagsan, nuuraan ayna ukoraan si caadi ah boosaska. Geedaha adkaysiga leh ee ubxiya waa inay muujiyaan cusayb geedaha caleenlayda ahina waa inay umuuqdaan kuwo caafimaad leh oo qurxoon.

Geedaha sunta ah iyo kuwa xididada waxyeeleeya waa inaan lagu arag aagaga.

Waraabyada waa lagu sameeyaa meelaha angagan iyo markasta oo geed cusub labeero.

Daawaynta waxaa lalasameeyaa unugyada xiliga gu'ga iyo dayrta.

### *Maareynta*

Xkamaynta geedaha sunta ah ee farsamo, waa in lasameeyaa 3 jeer sanadkii ama kabadan.

Jarida waa in lasameeyaa hal mar bishii. Qaybaha dhintay ee dhacay ee geedka waa lasiibaa.

Daawaynta waxaa lagu sameeyaa sanadkii mar unugyada sida dooxa lo'da, huudhada iyo busta oo lagaliyay lakab qiyaastii ah 5-10cm balac ahaan. Caleemaha waa in ladaadshaa inta lagu jiro dayrta ayadoo lasocoto wasaqda iyo geedaha wax daboola.

Geedaha adkaysiga leh waxaa markale lajaraa xiliga gu'ga.

Meelaha angagan waa lawaraabshaa markasta.

Geedka dhintay oo waxyeeloobay waa lasiibaa.

Qaybinta geedaha adkaysinka leh waxaa lasameeyaa gu'ga iyo dayrta.

### *Maarayn saxid ah*

Geedaha adkaysinka leh ee dhintay, waxyeeloobay oona jiran waa labadalaa ayadoo lalatashanaayo B. Waxyaabaha waxaa qarashkooda dhiibaaya B. Waxyeelada wayn ee laga arkay waa in lagu soo daraa qorshaha maaraynta.

## T1.1253 Geedaha nuura

### *Shayga maareynta*

Geedaha ubxiya gu'ga iyo dayrta. Noocyo kala duwan oo geedaha nuura ah sida scilla, crocus, tulips, autumn crocus iwm.

### *Shuruudaha shaqo*

Geedaha nuura waa in loo arkaa kuwo caafimaad qaba oo bilicsan. Waa inay abuuraan aagag soojeedasho leh bilowga ama dabayaaqada gu'ga iyo dayrta. Ubaxyada iyo caleemaha waa inay si wacan ukobcaan in lagu jiro xiliga.

Daawaynta geedaha nuura waxaa lasameeyaa markay ubxinayaan sanadkasta xiliga gu'ga.

### *Maareynta*

Jarida waxaa lasameeyaa xili kobceedka 3-5 jeer. Tani waxay qusaysaa geedaha nuura ee aagaga sariirta ubaxa.

Daawaynta waxaa lagu sameeyaa daawo lahabeyay (NPK) iyo cunta dhiid marka geedaha nuura ay magooliyaan bilowga xiliga.

Waraabinta waxaa lasameeyaa hadii gu'gu qalayl yahay dhulkuna uu qaboow yahay.

Geedaha nuura ee jiran waa in lajaraa.

### *Maareyn saxid ah*

Geedaha nuura kuwaasopo lawaayay kuwo cusub ayaa lagu badalaa xiliga dayrta. Talaabadaan waxaan lasameeyaa ayadoo lala tashanaayo B. Geedaha nuura ee cusub waa in labeeraa waxa aan kadanbayn asbuuca 40aad.

## T1.126 Geedaha sariirta ah

### *Shayga maaraynta*

Ubaxyada-, gu'ga, xagaaga iyo dayrta ee sariiraha ubaxa kujira, sanduuqyada daaqada ama ilinka.

### *Shuruudaha shaqo*

Ujeedada geedaha sariirta waa in lasharxo lana qurxiyo. Tan macnaheedu waa in meelaha wax lagu beeray umuuqdaan kuwa ilxiran, caafimaad leh oo bilicsan.

Geedka dhintay oo waxyeeloobay waa lasiibaa.

Daawaynta waxaa loosameeyaa si joogtaa si loo buixiyo kobac wanaagsan iyo ubxin inta lagu iro xiliga.

### *Maareynta*

Waraabinta iyo jarida waa in lasameeyaa 1-3 jeer asbuucii dhamaan xiliga kobaca oo dhan.

Godadka/sanduuqyada banaanka ayaa ladhigaa waxaana laga buuxshaa ciid baraajan 1da April ugu danbayn.

Beerida waa in lasameeyaa sadex jeer sanad kasta sida kucad jadwalka latashiga B.

Xakamaynta geedaha sunta ah ee farrsamo waa la sameeyaa markasta ee jarida ama waraabinta.

Daawaynta waa in lasaeeyaa ayadoo lala samaynaayo waraabinta leh NPK (daawooyin dhamaystiran) ama daawooyinka gaar ahaaneed ee geedaha sariirta ah halkii $m^2$.

Iskuxirida ubaxyada badan.

Godadka/sanduuqyada waa labaneeyaa waxaana looqaadaa kaydka diraacda markay tahay 31da December. Geedaha dhintay oona jiran waa lasiibaa.

### *Maarayn saxid ah*

Badalida geedaha sariirta waxaa lasameeyaa marka lalatashato B. Faragalintaan waa shaqo “ÄTA” (badalid iyo kudarid) uuna qarashkeeda bixinaayo B.

## T1.2 Geedaha dhulka daboola

### *Shayga maareynta*

Tusaale ahaan, wadooyinka iyo meelaha kale ee dhaguxu daboolay, bareega, sibirka shubka ah, laamiga, qaruuraxa, alwaaxa, sida daashashka, daaradaha, fulaacyada ee dhulka ah ama meelaha dhismayaasha kuxiga, garoomada ciyaaraha.

Sharaxaadaha baakinka hore inta ayaa lagu muujiyay. Meelaha gudaha ah ee geerashyada baakinka waxaa lagu muujiyay T3.25, TECHNOLOGY 99.

### *Shuruudaha shaqo*

Shaqada kunturaada waa in lasameeyaa si loohelo dhoofin amaan ah oo lagu qanco ee wadooyinka iyo meelaha kale ee siman. Waxyeelada waa in si degdeg ah loogu gudbiyaa B.

Goobaha waa inaysan lahayn wasaq, kurtumo, geedaha sunta ah iyo raasaasa maalka caleemaha iyo waxyaabaha kale.

Goobtu waa inuu gabi ahaanba,yahay, nadiif ahna amaan.

Graffiti iyo kharibaadaha kale si degdeg ah ayaa wax looga qabanayaa.

Xnaanada iyo maaraynta waa in loo sameeyaa hab deegaan ahaan wanaagsan.

Waa in laxakameeyaa geedaha sunta si aysan udhicin carqaladayn kudhex qaldamida geedaha sunta ah geedaha dhulka daboola.

### *Maaraynta*

Nadiifimta guud

Goobaha waxay lagu samaynaayaa nadiifin guud hal mar asbuucii laga bilaabo 1da March ilaa iyo ayna kujirto 31da December si lamida marka dhul banaan uu jiro xiliga bilaha diraacda.

Waqtiyada kale, tusaale. markuu barafku da'aayo, aagaga waxaa lagu sameeyaa nadaafad guud laba jeer bishii ama si kasii hoosaysa haduu jiro baraf badan.

### *Maareyn saxid ah*

Ciladaha waa in ladukuminti gareeyaa ayadoo sawiro laraacinaayo lana gudbiyaa marka xiliga diraacda ee maaraynta wadada uu dhamaado.

Cabirada waxaa qarashkooda bixinaaya E hadii qarashaadka ciladaha ay waajib kutahay dushooda, hadii kale qarash waxyeelada waxaa dhiibaaya B.

## T1.21 Goobaha dhagxaanta, bareeyada, sibirka shubka ah, qaruuraxa iyo laamiga

### *Shayga maareynta*

Tusaale ahaan, wadooyinka iyo goobaha kale ee dhagaxaantu dabooshay, bareega, sibirka shubka ah ama laamuyada ayna kujiraan kaabadaha, sida galo, raadadka iyo wareega, baakinada, garoomada ciyaarta iyo dayrarka si lamidana garoonka ciyaarta.

### *Shuruudaha shaqo*

Dhamaan goobaha waa inaysan wasaq yeelan, caqabadoh iyo waxyaabo kale.

Goobaha qaruuraxa ah waa in si is leg loo balaarshaa looguna daboolaa qaruurax, si markaas heer sax ah oo siman loo helo (3-5cm). Jiidida/balaarinta ama jilcinta waa in laba jeer sanadkii lasameeyaa meelaha jaayga iyo ciida ah.

Nadiifin guud ayaa lasameeyaa cawska duugaa iyo kurtumada waa lasiibaa gu' kasta, waxaan kadanbayn 31da May.

\Goobaha laamiga ah dhagaxaanta kaabada ah waa inay dhanyihiin nadiifna yihiin.

Dhamaan goobaha waa inay helaan nadiifin guud lagana ilaaliyaa wasaqda iyo qashinka.

### *Maaraynta*

Goobaha laamiga ah iyo sibirka shubka ah waa kuwo mashiin uu xaaqay sadex jeer gu' kasta (qaruurax iyo ciid waawayn), halka sidoo kale xaaqida caadiga ah lasameeynaayo waqtiyaa xaaqinka. Majiraan waxyaabo haraa ah oo kuharaya goobaha kadib marka lasameeyo nadiifinta gu'ga.

Jaridawaa in lasaeeyaa dhama goobah ugu yaraan labajeer sanadkii. Hawsha jarida ee ugu horaysa waa in ladhameeyaa 31da May.

### *Maarayn saxid ah*

Meelaha dhulka ah ee waxyeeladu gaartay iyo ciladaha doboolka ah waa in ladukumiinti gareeyaa loona gudbiyaa B. Cabirada ayaa la amraa dheeraad sida shaqo “ÄTA” (badalid iyo kudarid). Boodooyinka iyo waxyeelooynka dhaxanta ee kale waxaa ladaweeyaa xiliga gu'ga, ayadoo lalatashanaayo B.

## T1.23 Meelaha alwaaxa lagu daboolay

### *Shayga maareynta*

Tusaale ahaan, goobaha alwaaxa lagu daboolay ayna kamid yihiin kaabadaha, sida daashyada, daaradaha iyo fulaacyada.

### *Shuruudaha shaqo*

Goobaha alwaaxu daboolay waa in la ilaaliyaa lana maareeyaa si ay ugu shaqeeyaan sidii larabay, ayna yihiin nadiif ayna lahayn cilad wax gaarsiin karta dadka deegaanka. Daboolka alwaaxa waa in la ilaaliyaa si ay bilic ugu yeelaan guriga.

Hadii goobaha loo isticmaalo marin ahaan, waa in laga xaaqaa barafka lana jaraa si looga hortago kubariiqasho. Laakiin ciid laguma dari karo maadaama ay burburinayso.

### *Maareynta*

Goobaha waxaa lanadiifiyaa gu'ga iyo dayrta saabuun ama waxyaalaha xoolaha nool laga sameeyay ayaana lagu nadiifiyaa. Goobaha qaar waxaa lagu dhaqi karaa cadaadis.

Alwaaxyada lasaliideeyo saliid ayaa lamariyaa gu' kasta.

Kormeerka iyo nadiifinta si joogto ah ayaa loo sameeyaa.

### *Maareyn saxid ah*

Qaladaadka si degdeg ah ayaa loo gudbiyaa loona dayactiraa ayadoo lalatashanaayo B. Dhamaan qaladaadka iyo gaabisyada waa in lasawiraa taariikhna loo yeelaa.

## T1.3 Qalabka ugaarka ah dhulka lahormarshay

### *Shayga maareynta*

Tusaale ahaan, xirmooyinka, aaladaha wax lagu galo, ciyaarta- iyo qalabka isboortiga, qalabka baainka caariga iyo meelaha lagu dabaasho.

### *Shuruudaha shaqo*

Qalabka gaarka ah ee dhulka lahormarshay waa in la ilaalshaa lana maareeyaa si ay ugu shaayso sidii larabay, ayna tahay nadiif aysana lahayn cilad keeni karta dhaawac. Shuruudaha midabka iyo shaqada waa in labuuxshaa ayadoo lamaraayo koormeerka caadiga ah iyo wargalinta.

### *Maareyn saxid ah*

Geesaha qalabka gaarka ah ee dhulka lahormarshay waa lahubiyaa waana latoosiyaa gu' kasta magdhaw dheeri ah. Qalabku waa inuu buuxiyaa shuruudaha maamulka si joogta ahna loo hagaajiyaa.

## T1.31 Xirmooyinka iyo aaladaha wax lagu galo

### *Shayga maareynta*

Tusaale ahaan, xayndaabyada, xeryaha, kuwaan dhisnayn, jid tareemada, darbida, jidaarada shubka ah, albaabada iyo jid dhagxaanta waa wayn ayna kujiraa matoorada iyo aalada wax xakameeya.

Qufulada iskujira, galida maamulka iyo teleefanada albaabka waxaa lagu sheegay T6, TECHNOLOGY 99.

### *Shuruudaha shaqo*

Shaqada kunturaada waa in lafuliyaa si aan loo ogolaan galitaan aan sharci ahayn uuna keeno baylahayn katimid xirmooyinka iyo aaladaha wax lagu galo. Xirmooyinka iyo aaladaha wax lagu galo waa inay wacnaadaan ayna nadiif yihiin. Shaqada waa in la maareeyaa kormeerna loo sameeyaa si oogta ah.

### *Maareynta*

Xeryaha, jid tareenada, albaabada iyo jid gooyooyinka waa la xaaqaa halmar sanadkii.

Shaqada qunfulada iyo qataarada albaabada iyo jid gooyooyinka waa la hubiyaa, waana la dhaashaa oo labalaariyaa labo jeer sanadkii ama kabadan hadii loo baahdo.

Shaqada aaladaha galitaanka waa lahubiyaa waana la balaariyaa laba jeer sanadkii hadii loobaahdana kadan.

### *Maareyn saxid ah*

Maarayn sixid ah waa in lasameeyaa si dhaqso ah si loo sameeyo magdhaw dheeri ah marka halis amaan ay timaado. Hadii loo baahdo eesha cabiraado dheeri ah ay muhiim yihiin, laxariir B kahor intaan talaabo laqaadin.

## T1.32 Qalabka- ciyaarta iyo isboortiga

### *Shayga maareynta*

Tusaale ahaan, jaqafyada ciida iyo qalabka ciyaarta ee dhulka lahormariyay, qalabka isboortiga ee kubada cagta, teeniska iyo kubada kolayga.

### *Shuruudaha shaqo*

Xnaanada iyo maaraynta qalabka garoomada ciyaaraha iyo ciyaaraha waa inay buuxiyaan shuruudaha kujira SS-EN 1176-1–7 and SS-EN 1177.

### *Kormeer*

Sheeg meelaha kormeerka garoomada ciyaaraha lagu samaynaayo sababo amni awgeed si joogtaa ayadoo laraacaayo shruucda kuxusan SS-EN 1176-7.

Kormeerka garoomada iyo qalabka ciyaaraha waa in lasameeyaa halmar asbuucii laguna soo gudbiyaa qoraal ahaan.

### *Maareynta*

Sheeg meelaha maaraynta garoomada ciyaaraha lagu samaynaayo sababo amni awgeed ayadoo laraacaayo shruucda kuxusan SS-EN 1176-7.

Hubinada dhanka amaanka ee garoomada iyo qalabka ciyaaraha waxaa lasameeyaa halmar sanadkii waxaana samaynaaya kormeere shahaado wata. Kormeerada shaqada waa in lasameeyaa afar jeer sanadkiiba uuna sameeyaa shaqaale loo tababaray. Kormeerka waxaa lasameeyaa asbuuc kasta ama maalinkasta.

Kormeerka sanad laha ah ee dhaaan meelaha iyo qalabka ciyaarta waa inuu sameeyaa qof qibrad shaqo uleh sharciyada kuxusan SS-EN 1176.

Inta lagu jiro hubnta bilaha ah, daganaanshaha si lamida shaqada waa in la hubiyaa.

Cabirada soo socda ee maaraynta ah waa in laqaadaa ayadoo laraacaayo tilmaamaha soosaaraha, hase yeeshee ugu yaraan asbuucii.

- Nadiifimta guud
- nadiifin
- rdib uxoojinta lifaaqyadas/boobsiiyaasha/qawsyada
- Badalida qalabka kahortaga gariirka ayadoo laraacaayo shuruudaha SS-EN 1176 ee ugu yaraan 500mm
- Dhaashida kalagoysyada caalamiga ah
- badalida ciida ciyaarta (caaryada leh) jajaqafyada ciida kujira
- Ciida garoonka ciyaarta lagu cabiray, la iskuduway ama labadalay.

### *Maareyn saxid ah*

Maaraynta saxida ah waa in si degdeg ah loo sameeyaa looguna gudbiyaa B si loo sameeyo magdhaw dheeri ah.

Qalabka ama goobta ciyaarta ee jaban ama ciladaysan waa in la xayndaabaa ama ladaboolaa si aysan caruurtu u isticmaalin ilaa qalabka la dayactiro ama lafurfuro.

## T1.38 Qalabka ugaarka ah dhulka lahormarshay ee kala duwan

### *Shayga maareynta*

Tusaale ahaan,boostooyinka, calaamadaha dhulka lahormarshay iyo daashyada, garaafaha qashinka, haashtariigyada, calamada, calan baalayaasha, qalabka baakinka baaskiilada, roogaga, maryaha iyo farshaxanka iwm.

### *Shuruudaha shaqo*

Garaafaha qashinka iyo aashtariikyada waa in labaneeyaa intaysan buuxsamin aysana sababin ur aaga. Boostooyinka, calan baalayaasha iyo qalabka kale waana in laga dhigaa mid ka caagan wasaqda.

### *Maareynta*

Qalabka waa in lanadiifiyaa sanad kasta, labadii jeer ayadoo laraacaayo maalmaha nadiifinta. Calaamadaha waa in laga ilaaliyaa asaqda iyo barafka.

Jaqafka wasaqda iyo aashtiriigyada la baneeyo asbuuc kasta lana nadiifiyaa halmar sanadkii.

Boostooyinka ayaa la adkeeyaa.

### *Maareyn saxid ah*

Waxyeelada iyo ciladha waa in loo gudbiyaa B. Badalida qalabka ayaa lasameeyaa ayadoo lala tashanaayo B.

## T1.41 Qalabka llinka hore

### *Shayga maareynta*

Qalabka larari karo oo cayiman.

### *Maareynta*

Qalabka larari karo ayaa laga saarayaa kaydka xiliga gu'ga dibna loogu celinayaa xiliga dayrta ama waa ladaboolayaa hadii macmiilku sidaas rabo.

Qalabka banaanka laba jeer ayaa lanadiifiyaa sanadkii waana lasaliideeyaa halmar sanadkii.

### *Maareyn saxid ah*

Ciladaha iyo waxyeelooyinka ayaa si joogta ah loogu gudbiyaa B.

## T1.81 Boosaka maamulida qashinka (xarunta dib u wirshadaynta)

### *Shayga maareynta*

Tusaale ahaan, qashinka ay kujiraan wasaqda guriga, wasaqda baalkiga iyo waxyaabaha dib loo warshadayn karo ee meelaha kuwareegsan.

### *Kormeer*

Kormeerida meelaha awaamir iyo badbaadada waa in lasameeyaa hal mar asbuucii.

### *Maareynta*

Wasaqda kabaxsan konteenarka waxaa lagu ridaa konteenarka ayadoo lakormeeraayo.

Nadiifin guud ayaa lagu sameeyaa meelaha kuwareegsan halmar asbuucii waqtiga kormeerka iyo nadiifinta.

### *Maareyn saxid ah*

Ciladaha iyo waxyeelooyinka ayaa si joogta ah loogu gudbiyaa B.

## T1.83 Dayrarka

### *Shayga maareynta*

Tusaale ahaan, dayrarka, daashyada, fuloocyada iyo buurarka.

## *Kormeer*

Dayrarka lawadaago waa in lakormeeraa halmar asbuucii laga bilaabo 1da April–ilaa15th November.

## *Maareynta*

Xakamaynta geedaha sunta ah waa in alsameeyaa 5-6 jeer sanadkii inta lagu jiro waqtiga kabilaabanaaya April–September

Nadiifinta guud waa in lasameyaa hal mar asbuucii ayadoo lakormeeraayo.

Faluucyada, dayrarka iyo daashyada ee xiliga gu'ga iyo ugu yaraan sanadkii hal mar. Dhawrsanaan

Daboolada waxaa loo arkayaa inay yihiin nadiif dhawrsan.

## *Maareyn saxid ah*

Ciladaha iyo waxyeelooyinka ayaa si joogta ah loogu gudbiyaa B lana dukumiinti gareeyaa.